## Dugsiga iswidhishka

Carruurtu waxa ay bilaabaan fasalka hore goorta ay buuxiyaan 6 jir dugsiga hoosana goorta ay buuxiyaan 7 jir. Dugsiga hoose waxa ay dhigtaan carruurta 9 sanno. Fasalka hore ee carruurta ay da'doodu tahay 6 jirro iyo dugsiga hooseba waa qasab dhigashadoodu.

Maalin dugsiyeedka ka dib ardaydu waxa ay tagi karayaa firitidiska laga bilaabo goorta ay buuxiyaan 6 sanno illaa iyo inta ay ka gaadhayaan 13 jir. Ka dib waxbarashada dugsiga hoose ardayda badankood waxa ay sii wataan dhigashada dugsiga sare ee saddex sanadlaha ah.

## Ku soo dhawow dugsiga degmada Västervik

Västervik waxaa ku yaal dugsiyo ay leedahay degmada iyo dugsiyo si gaar ah loo leeyahay. Dhammaan dugsiyada dhigashadoodu waa bilaa lacag.Ka bixin meysid ilmahaaga waxbarashadiisa wax lacag ah. Dugsiyada dhammaantood waxay raacaan isku hal manhaj oo waxbarasho, waxayna ka wada shaqeyaan in ay buuxiyaan isku hal shardi oo aqooneed.

## Waalid/xanaaneeyaha/qof lala xiriiro

Fursadaha ilmaha ee ah in uu dugsiga si fiican ugu guuleysto waa ay kordhaysaa haddii ay wada shaqeynta guriga iyo dugsiga ka dhexeysa ay wanaagsan tahay. Dhawr tusaale oo ku saabsan waxa aad sameyn lahayd:

- ka qeyb gal kulamada dugsiga uu kuugu yeero
- ka qayb qaado warbixinnada dugsiga laga soo diro, tusaale ahaan warqadda toddobaadlaha ama bologga fasalka.
- sheeg haddii uu ilmahaagu xanuunsanyahay yahay iyada oo la raacayo xeerka dugsiga.
- la xiriir dugsiga haddii aad qabtid su´aalo ama aad ka welwelaysid wax khuseeya ilmahaaga.
- hubi in uu ilmahaagu nastay, soona cunteeyey uuna maalin walba waqtiga ku yimaado dugsiga.
- hubi in ilmahaagu uu wato buugaagta dugsiga iyo dharka ciyaaraha fudud ee maalintaas dugsiga looga baahan yahay.
- xog ogaal u ahaw xeerarka dugsiga, kana caawi ilmahaaga in uu fahmo uuna ku dhaqmo.

